
# Halgankii ummadda iyo
# Halyey Mujaahid Aadan Sheekh Maxamed

**Farshaxan**
**17ka Oktoobar, 2010ka**
**Mujaahid: Aadan Sheekh Maxamed Cabdi Casoowe (IHUN)**

**Hordhac:**




"Islaw dara-diggiisii,
Danab Aadan Shiiniyo,
Dadban baan ku dhaartay,

Karuur duur-xulkiisii,
Iyo Damalki Koosaar,
Dedan baan ku dhaartay,

Dil-dillaanka dhiiggiyo,
Inta nacabku dooxee,
Dahan baan ku dhaartay,

Inta daaha dhagartiyo,
Ku xidh-xidhan dalluuntee,
Dabran baan ku dhaartay,

Dalan-doolka caydhiyo,
Dingaraarka mudankiyo,
Dib-jirkaan ku dhaartay,

Inta cadowgu dayrshee,
Dibadaha u hoyatee,
Dulman baan ku dhaartay

Daalalley, Maxamed Ibraahin Warsame, "Hadraawi".

Bishii Oktoobar ee gu'gii 1984kii waxay ahayd maalin Mujaahid kastaa dareen gaar ah iyo tilmaan lama-illaawaan ah uu ku maamuuso.Waxaa diyaargaraw dheeraad ah sameeyay ciidamadii Faqashta. Waxaa la soo soocay ciidan beeleed si gaar loo soo xushay lana soo dejiyay ag-agaarka Burco-duurrey. Mujaahid Maxamed Xaashi Diiriye "Lixle" (IHUN) ayaa hoggaanka u qabtey ciidammo gudaha dalka soo galayay.Waxaa xilligan Xoghayaha Ciidammada Xoreynta ee SNM ahaa Mujaahid Aadan Sheekh Maxamed Cabdi Casoowe oo loo yaqaannay "Aadan Shiine"(IHUN). Mujaahidkani wuxuu aad uga dhawaa jiidaha

dagaalka, waxaanu u badnaa garab-jooga ciidammada, isaga oo la sheegi karo inta uu tegay magaalooyinka ama dhaafay Jigjiga.

Mujaahid Aadan Sh.Maxamed Cabdi Casoowe"Aadan Shiine" ayaa hawshan gudo-galka ka soo jeediyay in uu saraakiishii ciidammada ku diyaariyo goobaha looga baahan yahay, ayna wacadaro ka geysan karaan. Mujaahid Ibraahim Cabdilaahi Xuseen (dhega- weyne) oo ka waramaya arintaa ayaa yidhi: "16kii Oktoobar waxa aan joogay meesha la yidhaahdo Sheed-dheer oo Goraya-cawl ka soo hor jeedda oo uu deggenaa ciidan. Intaa ka dib waxa ila soo hadlay Alle ha u naxariistee Aadan Shiine oo ahaa Xoghayihii Ciidammada Xoreynta ee SNM waxaanu ii sheegay in la iga beddelay halkaa oo aan u wareegayo dhinaca bariga gaar ahaan aagga uu joogay Lixle (IHUN) ee Burco-duurrey, xilligaana fadhiyada ciidamada SNM waxa ay u qorshaysnaayeen qaab deegaamaysan, isla markaana waxa socday oo uu Alle ha u naxariistee Mujaahid Lixle gacanta ku hayay qorshe ballaadhan oo loogu diyaar-garoobayay gudo-galka".

Isaga oo hadalka sii wata Mujaahid Dhega-weyne, waxa uu intaa hore ku daray: "SNM iyada oo aanu isku qancinay in aanay jirin sabab aanu Qaaxo u sii fadhinaa oo aanu go'aansannay in gudaha la isku shubo mar aanu shir ku yeelannay Laan-qayrta iyada oo uu markaa ka hor sidaana uu soo codsaday alle ha u narariistee Lixle oo yidhi waxa aan u baahanahay in la igu soo xoojiyo ciidan. Waayo aniga iyo Xasan Yoonis Habbane (IHUN) waxa aanu xilligaa ku qornayn Sheed-dheer oo galbeed ah. Gubad-daalaco waxa joogay Axmed Mire, Maxamed Kaahin-na waxa uu joogay Baali-dhaye, Ibraahim Kood-buurna (IHUN) waxa uu ahaa abaanduulaha Ciidamada xoraynta ee SNM".

Gu'gii 2009kii ayay mareegta Farshaxan waxa ay soo bandhigtay taariikhdii Mujaahid Maxamed Xaashi Diiriye "Lixle" (IHUN) si ay u qabyo-tirto taariikhda ummada Somaliland. Waxa kale oo ay mareegta Farshaxan xusaysaa dhammaan Mujaahidiinta oo noloshoodii qaaliga ahayd u hurtay si ay dalkooda iyo dadkoodaba u xoreeyaan. Xaqiiqaduna waxa ay tahay in aanu horumar gaadhin waddan aan taariikh lahayni.

Waxa Mujaahid Aadan Shiine aad loogu xusuustaa sidii geesinimada laheyd ee uu u hawl-geliyay ciidammadii SNM, aanay muddo gaaban gudaheed ku guulaysteen kor-u- qaadidda niyadda taageerayaashii SNM iyaga oo isla markaana niyad-jab ku riday ciidammadii cadowga ilaa hoggaamiyayaashoodii dil lala beegsaday Mujaahid Aadan Shiine wuxuu adeegsadey aqoontiisii ciidan, waxaanu Mujaahidku ku guulaystay in uu dagaal-gelin baahsan oo bari ilaa galbeed leh hawl-geliyay.

**Taariikh-nololeedkii Mujaahidka:**

Sheekh Maxamed Cabdi Casoowe (IHUN) waxa uu ahaa oday aad looga yaqaan dhulka Somaliland.Wuxuu degaan ahaan ku hano-qaaday degmadii Hargeysa, waxaanu ahaa ganacsade dukaan ku lahaa ag-agaarka hudheel Jabuuti ee magaalada Hargeysa. Gu'gii 1943kii Sheekh Maxamed Cabdi Casoowe iyo hooyo Xabiiba Axmed Cawaale waxa wiil uu ugu dhashey tuulada Gadh-yogol ee degmada Faraweyne kana tirsan gobolka Maroodi-Jeex ee dalka Somaliland. Waxa ay waalidkaasi wiilkaa ugu wan-qaleen Aadan, dadweynihii

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

kalena waxa ay ugu ladheen Shiine. Mujaahid Aadan Shiine wuxuu dugsiga hoose iyo dhexe ka galay medrasaddii Cabdiraxmaan Sheekh Ibraahin Baraawe ee magaalada Hargeysa.

Xilligaa uu ka baxay dugsiga waxa uu deeq waxbarasho ka helay ururkii Somali national League (SNL) ee madax-bannaanidii lixdankii horseedka ka haa. Tani, waxa ay u suurto-gelisay Mujaahid Aadan Shiine in uu ka mid noqdo ardeydii tacliinta dugsiga sare loogu qaaday magaalada Qaahira ee dalka Masar.

Mujaahid Aadan Shiine wuxuu waxbarashada dugsiga sare ka galay magaalada Qaahira. Magaalada Qaahira markaa waxaa waxbarasho ahaan ugu sugnaa arday dhawr ah oo ay ka mid ahaayeen Xaaji Xerow (IHUN), Aadan Muuse Jibriil oo ah wakiilka Somaliland ee London iyo qaar kale oo badnaa. Waxa kale oo halkaa mar danbe yimid kuna soo gaadhey Mujaahid Aadan Shiine aqoonyahanno uu ka mid ahaa Mujaahid Rashiid Sheekh Cabdillaahi oo loo yaqaanno Rashiid-gadhweyne.

"Waxa aan Mujaahid Aadan Shiine kula kulmay magaalada Qaahira oo uu dugsiga sare kaga jiray sannad-dugsiyeedkii 1963$^{kii}$-1964$^{kii}$, aniguna aan waxbarashada dugsiga sare halkaa u tegay", ayaa uu yidhi Mujaahid Rashiid Sheekh Cabdilaahi oo ka warramayay halkii ugu horreysay ee ay ku kulmeen isaga iyo Aadan Shiine. Isaga oo Mujaahid Rashiid hadalkiisii sii wada ayuu sheegay in uu Aadan Shiine iyaga ka horreeyay saddex gu', ayna halkaa xilligaa ku sugnaayeen dhallinyaro badan oo waxbarasho u joogtay dalkaa Masar.

Dhallinyarada joogtay magaalada Qaahira aad ayay u fir-fircoonaayeen, dedaal waxbarasho oo weynna waa ay hayeen. Waxaa jiray meelo ay ku kulmaan oo runtii ahayd meelaha uu Mujaahid Aadan shiine aad uga muuqday. Ardaydaa Qaahira joogtay waxa ay is-weydaarsan jireen doodo iyo weedho ku saabsan ka-sheekaynta kooxaha kubbadda cagta ee xilliyadaa caanka ahaa sida Al-Ahli oo kale. Wuxuu ahaa nin kaftan- wanaag leh, aadna u ixtiraam badan, lana jeclaan jiray marka uu madasha bar-kulanka joogo. Sida oo kale Mujaahid Aadan Shiine wuxuu ciyaari jiray kubbadda cagta , ilaa uu lug ka jabay oo ay u suurto-geli wayday in uu sii wado ciyaartii kubbadda cagta.

Markii uu Mujaahid Aadan Shiine dhammeystay waxbarashadiisii ayaa uu iskii ugu baqoolay magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya. Dalalka Carabta waxaa waqtiyadaa aad ugu weyneyd qaddiyaddii hantiwadaagga iyo gumaysi-la-dirirka, waxa aanay dalalka Carabtu soo-dhaweyn jireen ardayda waddammada dhaqdhaqaaqa xornimo-doonku ka socdo iyada oo uu hoggaanka u hayay Jamaal Cabdinaasir oo ahaa madaxweynihii dalka Masar ee xilligaa. Waddankii Soomaaliya la odhan jiray wuxuu ka mid ahaa kuwaa dhaqdhaqaaqaasi ka socday ee saddexdii kale ee ka maqnaa (NFD, Soomaalida Itoobiya iyo Djibouti) u halgamayay. Waddammada Carabtu waxa ay bixin jireen deeq- waxbarasho oo u badan dhinaca millateriga si ay fikradahooda u meel-mariyaan. Mujaahid Aadan Shiine markii u tegay Suuriya waydiimo badan kama ay hor iman ee hore ayuu ka galay kulliyad millateri oo ku taallay magaalada Dimishiq.

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

**Xoogsi-tagistii Mujaahidka:**

Xilli ku beegnayd 1968kii ayaa uu Mujaahid Aadan Shiine ka soo noqday waddankaa Suuriya, waxa aanu ka mid noqday ciidammadii xooggii dalka ee waddankii Soomaaliya. Waxaa lagu qaatay Mujaahid Aadan Shiine derejada xiddigle, inkasta oo uu muddo aan sidaa u dheerayn gudaheeda uu ugu dallacay laba-xiddigle. Sida uu ka waramey Mujaahid Maxamed Cilmi Galan oo ay xilligaa ku kulmeen xaruntii 'Bootiko' ee beryihii danbe 'Dugsiga Xalane' loo bixiyay ee dadka laoogu kala sooci jiray inta "Kacaanka' u ehelka ah iyo in badan oo deyro la qoray oo lagu kadeedi jiray xarumihii nidaamkii Siyaad Barre .

Mujaahid Aadan Shiine waxa uu ka shaqeeyay: Gaalkacayo, Beled-weyne, iyada oo markii danbe loo soo beddelay Qaybtii 26aad aanu Taliye-guuto ka noqday Guutadii Danab ee ciidamada 'Kamaandoosta' ahayd saldhiggooduna ahaa magaalada Cadaadlay.

Xilli ku beegnayd 1980kii ayuu booqasho ku tegay magaalada Cadaadley Mujaahid Rashiid Sheekh Cabdilaahi. "Magaaladaa Cadaadley oo aan ku dhashay reerkayaguna deggenaa ayaan tegay waxaana ii suurto gashay in aan la kulmo Aadan Shiine oo halkaa ka ahaa Taliye-guuto. Intaa wixi ka danbeeyeyna aragtidayadu waxa ay iska ahayd teel- teel", sidaa waxa ku warramay Mujaahid Rashiid Sheekh Cabdilaahi mar uu ka warramayay mararkay kulmeen Mujaahid Aadan Shiine.

Dabayaaqadii 1980kii ayaa Mujaahid Aadan Shiine loo badaley guutada 15aad ee Gaaskii 1aad ee Madax-dadley kuna taalla gobolka Selel, waxa aanay woqooyi kaga toosan tahay magaalada Cabdilqaadir oo aan xuduudda Itoobiya waxba u jirin. Xilligan waxaa hadal-hayn badani ka jirtay in la dhiso ururkii SNM, iyada oo shir kasta aad looga hadli jiray sida ay suurto-gal u tahay in xadka laga tallaabo si loo helo xarumo millateri. Waxa xilligaa guri walba oo saameeyay: dilkii, dhicii, boobkii, xadhiggii, kufsigii iyo fal-xumadii xaddiga beeshay ee xukuumadii Afweyne Siyaad Barre.

Waxa beryahaa aad iskugu xidhnaa dadkii gudaha iyo dibadda oo wada qabay fikradda ah in la helo saldhigyo ciidan. Xilligan waxa diyaar loo ahaa in ururka lagu dhawaaqo salkana loo taago. Arrntaasi ma ay suurto-gelin. Maxamed Xaashi Cilmi oo ka mid ahaa aasaasayaashi ururka SNM, immikana ah wasiirka Maaliyadda ayaa ka warramay sababta dib-u-dhaca keentay, waxaanu yidhi: "Waxa la isla gartay in la helo xubno badan oo ururka ka muuqan kara, reero ayaa codsaday in ay isku noqdaan oo la sugo, halka sida oo kale la sugayay koox joogtay Xamar. Mujaahid Aadan Shiine wuxuu ka mid ahaa kooxaha diyaarka ahaa ee sugayay ku dhawaaqidda ururka."

**Taariikh-halgameedkii Mujaahidka:**

Taariikhda halgameed ee ummadda Somaliland waxa ay ahayd mid jirtay muddo dheer. Ummaddu dareenka ay ka qabtay gabbood-falka lagu hayo degaanka Somaliland iyo dadka degaba aad ayay ugu dhuun-dalooleen. Fal-celinta gardarradaa garabka ogina marba heer ayay taagnayd. Waxa jiray horraantii toddobaatanadii inay dareenkaa ku muujiyeen hal-abuurku silsiladdii Siinleey. Diisambar 1979kiina waxa curatay Deelleey oo socotay ilaa

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

bishii Abriil 1980$^{kii}$. Waxa ay ahayd ufadii halgankii hubeysnaa ee dibuxoreynta qaran ee SNM horseedka ka ahayd.

Muddo gaaban ka dib saraakiishii ciidammada ee ka soo jeedday degaanka haatan ah dalka Somaliland ayaa sameystay xidhiidh-hoosaad ku saleysan aayo-ka- tashi. Bishii Maarso 23$^{dii}$, 1979$^{kii}$ waxa Mujaahid Aadan Shiine ka qayb-galay shir lagaga hadlayay hawlaha SNM, isku-xidhnaanta saraakiisha iwm.Waxa kale oo shirkaa goobjoog ka ahaa Cabdilaahi Askar (IHUN), Mujaahid Lixle (IHUN), Saleebaan Nuux, Cabdi Duse, Yuusuf Warsame Siciid iyo qaar kale oo badnaa.

Bishii August 1979$^{kii}$ waxaa si hufan loogu diyaar ahaa haw-lgal mideysan oo lagu dhaqaaqo, waxa aanu goob-joog Mujaahid Aadan Shiine ka ahaa shir lagu gorfaynayay waxa u diyaarka ah iyo halka laga bilaabayo. Arrimahaa shirkan sida aadka loogaga hadlay waxa ka mid ahaa xidhiidhka xubnaha dibadda iyo hawlaha ay ku dhaqaaqayaan.

1980$^{kii}$ Mujaahid Lixle ayaa shaqada ka tegay, tani waxa ay u noqotay guul Mujaahidiintii kol haddii hoggaamiyahoogii arrintii u madax-bannaanaaday dhaqdhaqaaqiisuna aanu koobnayn immika.

Waxa markan aad la iskugu raacay in la baxo ama la tallaabo, in kasta oo ay dood badan qaadatay. Itoobiya waxa jiray berigaa colaaddii 1977$^{kii,}$ Dadkuna kuma ay calool- fayoobayn Itoobiya oo la magansado taageerana laga doonto. “Xilliyadan 1979$^{kii}$-1980$^{kii}$ in la baxo aad baa looga soo hor jeeday, taageerada dadkuna ma ay jirin. In kasta oo uu Mujaahid Aadan Shiine ka mid ahaa dadka aad u qabay fikradaa bixitaanka ah”, ayaa uu yidhi mujaahid Rashiid Sh.Cabdilaahi.

Mujaahi Maxamed Xaashi Cilmi oo joogay Qaahira ayaa dirawalka gaadhi kiro ah (Taxi) ka codsaday in uu geeyo safaarada Itoobiya. Dirawalkii Masriga ahaa ayaa si kedis ah u weydiiyay isaga oo Soomaali ah wuxuu ka doonayo safaaradda Itoobiya. Wuxuu markaa Mujaahid Maxamed Xaashi Cilmi ugu war-celiyay dirawalkii: “Wuxuu Saadaat ka doonay Tal-aabiib ayaanu annaguna Itoobiya ka doonaynaa oo dantayadaa ku jirta”. Tani waxa ay muujinaysaa xataa taageerada ay markaa urur ahaan ka heli lahaayeen dawladaha Carabtu in aanu xooganayn weliba dalka Masar oo Geeska Afrika dano gaar ah ka lahaa, biyaha Webiga Niilku ha ugu mudnaadeene.

Mujaahid Aadan Shiine wuxuu had iyo jeer dedaal ugu jiray sidii loo bilaabi lahaa halgan hubaysan. Mujaahid Ibraahin Maygaag oo arintaa ka hadlayaana wuxuu yidhi: “Intii aanu gudbin wuxu door fir-fircoon ka qaatay isku-xidhkii qarsoodiga ahaa ee saraakiisha ciidammadii reer woqooyiga, shir kasta oo SNM qabsatana wuxu ka qaadan jiray kaalin muuqata. Wuxu caan ku ahaa isu-soo-dhoweynta kooxa sarakiisha”.

Boobe Yuusuf Ducaale oo dhaqdhaqaaqyadii xilliyadaa goob-joog u ahaa, waxa uu noo sheegay: “Xilliyadaa abaabulka hoose socday gaar ahaan 1979$^{kii}$ iyo 1980$^{kiiba}$, waxa aan iman jiray Hargeysa, Burco iyo meelo kaleba. Inta badan hargeysa waxa aan kula kulmi jiray Maxamed Kaahin Axmed iyo Aadan Sheekh Maxamed oo labaduba Qaybta 26aad ay ka tirsanaayeen. Waxa aan xusuustaa in aan xataa Xabsiga Dhexe ee Mandheera ku booqan jiray

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Mujaahid Shahiid Maxamuud Xaaji Xasan oo Hurre loo yaqaannay iyo xertii la xidhnayd oo si hoose oo qarsoodiya ugu jiray abaabulka loo dhammaa."

Ugu danbayn ayaa bishii Abriil 6[dii] gu'gii 1981[kii] lagaga dhawaaqay aasaaskii ururka SNM magaalada London ee carriga Ingiriiska. Waxa markaa bilaabmay geeddigii ciidan ee carriga Itoobiya, waxaana ugu hor baxay Guutadii 4aad ee Gaaskii Axmed Gurey oo ay hoggaaminayeen Maxamed-cali Faarax iyo Axmed Sheekh Faarax oo Dhuxuloo yaqaannay. Halkaa waxa ka bilaabmay in gude iyo dibadba lagu qulqulo saldhiggii ugu horreeyay ee SNM ee Durya-dheer.

Mujaahid Boobe Yuusuf Ducaale oo ka waramayay sidii saraakiishu u tallowday ayaa mar aanu wareysannay, yidhi: "Sida saraakiishu u kala horreysay arrin farsamo ayay ahayd oo sanqadh-tirasho ayaa lagu baxayay. Giddi waxa la wada aamminsanaa in Itoobiya la tago sababo badan awgood. Soomaaliya Siyaad ayaa ka talinayay. Jabhadihii dhinaca Itoobiya ka soo socdayna wax badan laguma lahayn. Cabdillaahi yuusuf iyo Siyaad Barre wax caynkaas ah kuma kala duwanayn. Waxa loo arkayay ka jooga iyo ka soo socdaaba in ay cadow yihiin. Waxa la isla gartay in la tallaabo oo halkaa hoggaanka laga qabsado".

Saraakiisha ka soo jeedday gobolladii woqooyi waxay ka midaysnaayeen in si deg deg ah wax looga qabto dhibta, cadaadiska, dilka joogtada, iwm ee dhulka ku faafay. Waxaa markaa diyaar loo ahaa bixid, hase yeeshee dilkii xaq darrada ahaa ee maamulkii Qaybtii 26[aad] u geystay Mujaahid Kornayl Cabdillaahi Xaaji Siciid (IHUN) bishii Jeeniweri 27[dii], 1982[kii] ayaa soo deddejisayy bixitaanka saraakiisha. Mujaahid Cabdilaahi Xaaji Siciid waxaa dilkii foosha xumaa loogu geystayy degaanka Dharkayn-geeye kana tirsan gobolka Sool ee Somaliland.

Bishii Jeeniweri 30[dii] ee gu'gii 1982[kii] Mujaahid Aadan Shiine iyo Mujaahid Axmed Daahir Nuur (Axmed Dhagax) ayaa noqday saraakiishii ugu horreysay ee u tallaaba dhinacaa Itoobiya, kuna biirya guutadii 4[aad] oo gogol-xaadh u noqday ururkii SNM. Waxaa markaa ku xigay Mujaahid Aadan Saleebaan (IHUN) iyo Mujaahid Maxamed Kaahin Axmed oo haatana ah afhayeenka Xisbiga Kulmiye iyo Korneyl Muuse Nadiif Allaale. Intaa ka dib waxaa oodda jabiyay saraakiishii, siyaasiyiintii, aqoonyahannadii iyo dad badano o kale oo ka mid noqday xubnihii ururka SNM.

Mujaahid Cabdiraxmaan Aw Cali Faarax ayaa ka warramay in ereyga 'tallaabid' loo isticmaali jiray ku-biiridda ururka SNM, gudaha ama dibadda qofku dhinaca uu doono ha ha ka yimaaddo e', waxaanu yidhi isaga oo arrintaa ka warramaya: "Horta tallaabidda dadku waxa ay u yaqaanneen in xadka gudaha laga tallaabo, qaarna waxa ay u yaqaanneen in SNM lagu biiro, laakiin anigu xadka kama aan tallaabin ee dibadda ayaan joogay xillii aan ku biiray SNM". Mujaahid Cabdiraxmaan Aw Cali waxa uu xilligaa joogay magaalada Qaahira, halkaas oo uu uga soo gudbay dhinaca Itoobiya horraantii gu'gii 1984[kii].

Mujaahid Boobe Yuusuf Ducaale oo ka waramayey qaabka bixitaanka saraakiisha ayaa yidhi: "Bixidda saraakiishu fursado iyo qorshayaal ayay ku xidhnayd. Hadba ciddii bixi karaysay ayaa baxaysay, maalinna lama wada bixi karayn ee tar-tiib ayuu qorshuhu ahaa iyo

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

hadba cidda lagu soo socdo ee la is-leeyahay waa la qaban doonaa oo la horreysiin jiray. Meesha waa la is-gaadayay".

Si kastaba ha ahaatee waxa jiray qorshe habeysan oo ku aaddanaa bixitaanka saraakiisha iyo sida ay u kala-horreynayaan. Waxaa arrintaa ku raacay oo ka warramay Mujaahid Maxamed Kaahin Axmed oo yidhi: "Iyada oo ay xidhiidhka gudaha iyo dibaddu wada socdeen raggayagii u horeeyay ambabaxayagu wuxuu ahaa 30[kii]-31[kii] Jeeniweri 1982[kii], waxaana ka mid ahaa nimankii baxay Marxuum Aadan Shiine, Marxuum Axmed Dhagax iyo Marxuum Maxamed-Cali oo isagu hore u sii diyaariyay ciidan loogu raad-gadanayey in ay yihiin Soomaali Galbeed (Guutadii 4[aad]), waxayna sii joogeen meel u dhaw meesha la yidhaahdo Duriya, aniguna (Maxamed Kaahin) laba habeen ayaan ka danbeeyay. Raggaa hore sida oo kale Marxuum Aadan Saleebaan ayaa isna tobaneeyo cisho naga danbeeyey. Tallaabiddu waxa ay ahayd wax qorshaysan oo in badan laga soo shaqeeyay, kuna xidhnaa ku-dhawaaqidii SNM iyada oo dhaqdhaqaaqyo ay socdeen intii aan lagu dhawaaqin SNM, markaa bixitaankayagu ma uu ahayn wax si kedis ah u yimid. Intaa ka dib colkayagii markii aanu baxnay waxa naga soo daba baxay saraakiil iyo aqoonyahanno faro badan, waxaana ka mid ahaa Korneyl Muuse Nadiif Allaale, Mijir Xaaji Qaaddi Maxamuud, Yuusuf Jaamac Buraale (Madax-diin), Shakiib Suldaan C/Qaadir, Maxamed Axmed Ibraahin (Dayib Guray), Cabdillahi Obsiiye (Cuddo), Ciise Curaagte iyo rag kale oo faro badan oo aanan halkan maanta ku wada tirin karayn".

Mujaahid Aadan Shiine waxa uu ka mid noqday taliskii guud ee Ciidammada SNM iyada oo uu xilkii ugu horreeyay ee uu qabtay ahaa taliyihii qaybta galbeed ee SNM oo magalaada Xarshin xarun looga dhigay.

Taliskii ciidan ee ugu horreeyay ee SNM yeelato waxa taliyaha Ciidammada dibuxoreynta qaran ee SNM loo magacaabay Damal Cabdilqaadir Koosaar Cabdi oo xilkaa hayay 1982kii ilaa bishii Juulay 1983kii.

Kal-fadhigii Golaha Dhexe ee SNM ee Noofambar 1983kii ku qabsoomay Jigjiga waxa loogu doortay in uu noqdo Guddoomiye-ku-xigeenka SNM. Maxamed Bashe oo arrintaa ka hadlayna wuxuu yidhi: "Toban bilood ka dib markii hoggaankii Mujaahid Sheekh Yuusuf (IHUN) xilka loo doortay, Noofambar 1983kii, ayaa hoggaankii saddexaad ee SNM xilka lagu wareejiyay magaalada Hararr. Hoggaankaas waxa keenada u qabtay saraakiishii ciidammada xag siyaasadeed iyo xag dagaal-gelineedba, waxaana Guddoomiye waxa loo doortay Damal Cabdilqaadir Koosaar Cabdi, Ku-xigeenna Danab Aadan Sheekh Maxamed (Aadan Shiine), Maxamed Kaahin Axmedna Xoghaye Guud".

Mar kale Mujaahid Aadan Shiine wuxuu ka qayb-galay Shirweynuihii 4[aad] ee SNM ee 1984[kii] oo Guddoomiye loo doortay Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo), immikana ah Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Mujaahid Ibraahim Meygaag Samatar oo arrintaa faallaynayayna waxa uu yidhi: "Waxa isugu kaayo horreysay Mujaahid Aadan Shiine Shirweynihii 1984[kii] oo aan Guddoomiye ka ahaa, Axmed Siilaanyana lagu doortay. Aadan iyo Axmed Dhagax, labadaba Allah ha u

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

naxariistee, waa kuwii ugu horreeyay ee xadka ka gudba si dagaal hubeysan loo bilaabo".

Waxaa kale ee uu mujaahid Aadan Shiine noqday xoghayaha ciidammada xoreynta ee SNM, Waxaanu xubin ka noqday Golaha Dhexe ee SNM.

Intaa wixii ka danbeeyay waxa uu ku hawlanaa hawl-gelinta ciidammada iyo isku-soo-dhaweynta saraakiisha. Wuxu ahaa sarkaal guurtiya oo odayaynta aad ugu faro-dhuudhuubnaa Mujaahid Cabdiraxmaan Cawl 'Baqdaadi' ayaa qoraal dheer arrintaa kaga hadlay, sidanna tilmaamay, "Bishii Sebtember 1985[kii] waxa aad u yaraaday hawl-galladii garabka hubaysan ee ay ka qaadayeen aagagga ka durugsan fadhiisimmada ciidammada cadowga, sababta oo ahayd saad, daawo iyo gaadiid la'aan awgeed. Arrintaasi waxa ay bilawday khilaaf xoog leh oo dhex galay garabka hubaysan iyo hoggaankii sare ee ururka oo gacanta ku hayay maamulka saadka, daawada iyo gaadiidka, waana sababtii keentay in uu xilka iska casilo Xoghayihii ciidamada xoraynta Mujaahid Aadan Sheekh Maxamed (Adan Shine)".

**Tilmaamihii Mujaahidka:**

Mujaahid Aada Shiine wuxuu ahaa ruux aad u degan,dulqaad badan.Wuxuu mujaahidku lahaa aqoon xooggan oo dhinaca ciidamada iyo diinta ah.Waxaa runtii mujaahidka u soo joogsan jiray dhamaan xubnaha ururkii SNM.Mujaahid Aadan Shiine wuxuu aad ugu heelanaan jiray qabashada hawl kasta oo la soo gudboonaata.

Waxaa mujaahidka aad loogu tilmaamay inuu ahaa saraakiisha ugu cadcad ee la hiigsado,aadna loo tixgeliyo.Mujaahid Rashiid Sheekh Cabdillaahi oo loo yaqaan Rashiid gadhweyne ayaa ka marag kacey arintaa yidhina: "Mujaahid Aadan Shiine waxa uu ka mid ahaa saraakiishii ugu cad-caddeyd SNM. Waxa uu ahaa nin aad u u deggan, mar walbana loo soo joogsado. Waxa uu ahaa nin af-gaaban oo hal adag."

Boobe Yuusuf Ducaale: "Aadan Shiine nin hadal badan ma ahayn. Qun yar ayuu socon jiray. Miskiin ayaa la moodi jiray. Laakiin marka uu u hollado in uu wax yidhaahdo hadal yaqaan murti-dhaadhiya ayuu ahaa oo kelmedda uu ku yidhaahdaa run ahaan ka dusayso jidhkaaga oo aad u dhex gelayso. Qof la yaab leh ayuu ahaa marka uu fadhiyada iyo shirarka ka baanayo, sarkaal adagna waa uu ahaa. Qof muslin ah oo aan salaad salaad ku darin ayuu ahaa. Qaad aad uma cuni jirin, fadhiyada se kama maqnaan jirin. Shaadadhka gacmo-dheerayaasha bar-barta leh ayuu jeclaa, hoostana waa uu marin jiray. Timo iyo gadhba waa uu lahaa. Marka uu socdo in uu fooraro ayaad moodi jirtay. Aad uma qosli jirin ee waa uu yar ilko caddayn jiray. Sida Shiine loogu bixiyay waa uu indho yar yaraa. Marka uu ilko-caddaynayo ma uu kala hayn kari jirin indhaha ee waa uu isku qabsan jiray. Qof dadka xaaladdooda aad u og ayaa uu ahaa oo qofba xaaladda uu ku sugan yahay aanay ka dednayn. Sarkaal, siyaasi, odey, aqoonyahan iyo dadkuba waa ay u soo joogsan jireen. Nin dhaqammadaas oo dhan kulmiyay ayaa uu ahaa. Mujaahidiinta waxba uma kala qarsoonayn oo meel ayaa lawada seexan jiray waxna lagu wada cuni jiray. Maalmaha qaar ayaan arki jiray isaga oo garanka iska saaraya. Waxa aan la yaabi jiray nabarradii jidhkiisa ku yaallay oo

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ii sheegay in ay kaga hadheen dulinkii ku cuni jiray dhufaysyadii uu ku jiray bilaha xilliyadii dagaalkii Itoobiya iyo Soomaaliya socday."

**Geeridii Mujaahidka**:

Gu'gii 1986[kii], bishii Diisambar 6[dii] ayaa ay xubno ka tirsanaa ururkii SNM oo uu hoggaanka u hayay Mujaahid maxamed Ibraahin oo uu magac-dagaalkiisu ahaa Bashiir (IHUN) qoorta u dheereeyeen Axmed Aadan oo ahaa Taliyhii nabad-sugidda ee Hargeysa. Hawl-galkaasi wuxu ka mid ahaa hawl-galladii ugu dhiirranaa uguna khatarta badnaa kuwii ay SNM fulisay. Xarumihii dooxatadii Xamar ayaa laga dhex kalluumaystay oo kii ugu weynaa suuqa Hargeysa dhexdiisa lagu toogtay hadh cad iyada oo aan Ilaahay mooyaane cid kale laga baqayn. Tani waxa ay ahayd guul laxaad weyn oo u soo hoyatay ururkii SNM, sababo badan awgeed. Waxa tilmaan mudan in ay tani soo af-jartay qorshihii debecsanaa ee baalasha laga goynayay bulshadii gobolladii woqooyi ku noolayd. Waxa kale oo ay rogaal celin ka ahayd hawlo ay ururka SNM dhexdiisa kay wadeen xubno uu mas'uulkani soo diray oo u adeegayay maamulkii Siyaad Barre.

Waxa ururkii SNM ku soo qulqulayey xubno badan oo ka soo goosanayey maamulkii huwantii Siyaad Barre. Sidaa darteed uma ay suurto-galayn maamulka ururkii SNM in ay xubin kasta oo cusub ku sameeyaan hubin hufan iyo baadhis qoto dheer. Waxa markaa xubnaha ku soo dhex dhuuman jiray koox ku hubaysan waxyaabo kala duwan, sida sunta iyo waxyaabo la mid ah. Kooxdani waxa ay ka hawl-galeen qaybaha kala duwan ee ururka. Xubnaha sar-sare ee ururka oo aad u feejignaa, lahaana aqoonteeda ciidan iyo nabad-sugidba ayaa suurto-gelin jiray in ay kooxahani fashilmaan. Waxaa ujeedada kooxahani ahayd inay dilaan xubnaha sar-sare ee ururka.

Waxaa la qabtay sida nin ku hubaysnaa suntaa oo markii lagu caddeeyay sheegay in loo soo diray dilka saraakiisha qaar ka mid ah. Waxaa kale oo la qabtay nin cunto kariye ka ahaa Dibiile, waxa sida oo kale jirtay barkad dhan oo la sumeeyay.

Degaanka ay ururka SNM degganaayeen ayaa aad ugu debecsanaa adeegsiga xukuumaddii Siyaad Barre sababo badan iyo baahiyo jira awgood. Tani waxa ay sababaysay in ay xukuumaddaasi waxyaabo badan ka fushan karto degaankaa oo qofka ay si qarsoodi ah u soo diraan helayo magangalyo iyo taageero xad dhaaf ah, waxaana arrintaa aad u taageeray Mujaahid Rashiid Sheekh Cabdillaahi oo yidhi: "Degaanka oo aad ugu debecsanaa hoggaankii Siyaad Barre, ayaa waxaa sii kaalmeyn jiray dhallinyarada iyo xoolo dhaqatada oo mar mar dagaal lagaga qaado aagaggaa, iyaguna sameeya fal-celin ay waliba gargaar ka dalbanayaan ciidankii SNM".

Markii qorshahaasi fashilmay dhaawac weynina dawladdii Siyaad Barre ka soo gaadhay dilkii Axmed Aadan ayaa waxa xidhiidh hor leh sameeyay dooxatadii nidaamka ee Siyaad Barre, Gaanni iyo adeegayaashoodii lahaa, waxaanay go'aansadeen in la isticmaalo dadka degaanka si ay u kaalmeeyaan ragga loo dirayo in ay soo dilaan saraakissha SNM.

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Isaga oo ka waramaya, xog dheeraad ahna ka bixinaya qorshayaashaa ayuu Mujaahid Ibraahin Maygaag yidhi: "Dilka Mujaahid Aadan Shiine  wuxuu ka mid ahaa qorshe dawladdii faqashtu ugu talo-gashay dilka madaxda SNM. Waxa keliya oo uga suurta-galay Aadan Shiine iyo dilkii Alla ha u naxariisto e' Mujaahid Cabdulqaadir Koosaar oo 17/7/187[kii] lagu toogtay magaalada Mustaxiil isaga hawlo urur halkaa u joogay. Baadhis xoog ah ayaa lagu sameeyay, muddo ka dibna nimankii falka sameeyay waa la qabtay".

Sida oo kale waxa dilkaa bal-ballaadhiyay qayb fiicanna ka qaatay ka-warbixinntiisa Feysal Cali Sheekh oo immika ah Agaasimaha Guud Wasaarada Warfaafinta ee Somaliland, waxaanu Feysal yidhi: "Alle ha u naxariiste Mujaahid Aadan Shiine waxa 8:00 fiidnimo lagu dilay badhtamaha magaalada  Jigjiga bishii Meey 31dii 1987kii, xilligaas oo uu marayay ag-aagaarka Masjidka Sheekh Cabdisalaan oo ku yaalla badhtamaha magaalada Jigjiga ee is-maamulka Soomaalida dalka Itoobiya oo lagula dilay Mujaahid Cabdikariim Axmed Cali oo macallin ahaan jiray loona yaqaannay Siyaad".

Waxaa dilkan si faah-faahsan sida kale uga warramay Mujaahid Maxamed Cilmi Samatar, isaga oo ka  hadlayay wararkii laga soo xigtay ninkii dilka geystayna, waxa uu  yidhi: "Waxa uu ninkii dilkaa geystay caddeeyay marka hore in uu Wajaale ka soo tallaabay, Jigjiga yimid, ka dibna u hoyday guri Jigjiga ku yaallay, halkaasna laba maalmood ku nastay. Maalintii saddexaad ayaa la tusay Aadan Shiine iyo Mahdi cali Faarax oo Jigjiga dhex socda. Aadan Shiine iyo Mahdi maalintaa waa ay wada fadhiisteen. Markii ay fiidkii ahayd ayaa uu Aaden Shiine ka soo kacay gurigii ay Mahdi Cali Faarax wada fadhiyeen. Hudheel Axmed Guri-joog lahaa ayaa uu ka soo casheeyay. Halka waxa uu kula kulmay Mujaahid Cabdikariim Axmed Cali, Siyaad iyo Mujaahid Axmed Yuusuf oo labaduba ahaa niman macallimiin hore ahaa. Markii ay casheeyeen ayay soo keceen, dariiqii ay gurigii ay seexanayaan ay ugu soo socdeen ayaa ninkani meel madow ah la joojiyay isaga oo haysta qori A.K. ah oo reer ka mid ah reeraha Jigjiga degaa u keeneen. Saddexdii nin oo soo socda ayuu Mujahaid Axmed Yuusuf dukaan ku leexday si uu sigaar uga soo iibsado. Labadii kale waa sii socdeen, Axmed Yuusuf markii uu sigaarkii soo iibsaday waxa uu u yimid labadii nin oo meyd ah. Waxa uu caddeeyay ninkaasi dilka geystay in uu markiiba qoriga dadkii lahaa u dhiibay".

Dilkan runtii  aad ayaa loo dareemay, dhabar-jab weyna wuu keensan lahaa ee xubnaha ururka SNM ayaa dhammaan ka mideysnaa hal-adeyg iyo inaan kolna la nuglaan ilaa guusha la taabtana aan la damqan. Feysal Cali Sheekh ayaa isaga oo ka hadlaya  dilkani raadka uu ku lahaa ururkii SNM, yidhi: "Dilka loo geystay Mujaahid Aadan Shiine waxa uu naxdin weyn ku noqday Mujaahidiintii SNM, kuwaas oo u arkayay Mujaahidka in uu ahaa tiirarkii ugu waaweynaa ee ay ku taagnayd Jabhaddii SNM, islamarkaana uu ahaa laf-dhabartii SNM oo cadawga ka farxisay, waxaanu ahaa ninkii isku waday ururkii SNM".

Boobe Yuusuf Ducaale oo dilkaa Mujaahid Aadan Shiine ka warramayayna, waxa laga hayaa oo uu yidhi: "Habeenkaa waxa aan joogay Jigjiga. Gurigayga oo aad uga fogaa goobta dilku ka dhacay ayaan ku sugnaa. Galabtaa ma aan qayilin sidii dhaqanku ahaa. Guryo 'Qoddobaha' la odhan jiray ayaan deggenaa oo aanu wadaagnay ama wada deggenaynba Mujaahidiin ay ka mid ahaayeen: Mahdi Cali Faarax, Xuseen Cali Xirsi iyo Cali Ismaaciil oo Cali Hayaan loo yaqaan. 'Qoddobuhu' wuxu ahaa ka 5[aad] ee xagga cisbitaalka guud ee

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Jigjiga. Yarkayga Aw Yuusuf yare oo markaa jiray sannad iyo 10 bilood ayaan la lugeeyay. Gurigii ayaan makhribkii ku soo noqday. Waxa ay xaaskayga iyo Bilan ii sheegeen in uu u yimid Cabdikariim Axmed Cali, Siyaad, oo jaad sitaa iyaguna ku yidhaahdeen: 'Aabbo maanta ma qayilayn.' Illeyn wad lama bajo. Ma sida aan u naxay. Maalmihii danbe ayaan isku odhan bal maa ay fadhiisiyaan sidii waxaan wedka ka baajin karayay. Markii aan soo noqday ayaan teeb ku dul fadhiistay si aan u garaaco xeer-hoosaadkii Golaha Dhexe ee SNM. Cabbaar markii aan fadhiyay ayaan goor caweysinkii ah maqlay rasaas aan badnayn .

Aniga oo halkii fadhiya ayaa waxa si dhiillo leh albaabkii u garaacay Yuusuf Cabdi Xasan oo Yuusuf Weyne loo yaqaanno oo cisbitaalka ku ordayay, waxaanu ii sheegay in Aadan Shiine iyo Siyaad la toogtay oo ay dhinteen. Yuusuf Weyne guri labaatan tallaabo wax ka yar u jiray halka Mujaahidiinta lagu toogtay ayaa uu fadhiyay. Waxa aan doontay Xoghayihii Xisbiga Shaqaalaha ee gobolka Jigjiga. Waanu isa soo raacnay. Goobtii lagu toogtay ayaanu tagnay. Dhiig badan ayaa qulqulay oo meel yar oo biyo-mareen ah ku dhawaaday in uu raaco. Xoghayihii ayaanu haddana is-raacnay oo cisbitaalkii ayaanu tagnay. Wuxu amray in qolkii meydka la furo, waana naloo furay. Waa Aadan Shiine iyo Siyaad oo meyd ah oo dhulka aanay waxba ka xigin iyo sibidhka. Aadan Shiine beerka ayuu u yaallay oo jidhkiisu wax fayow ayaa uu u muuqday. Kollay wejiga dhinacan i soo xigay ayaan arkay oo wuu fayoobaa. Siyaad qudhiisu hoosta mooyaane dusha waxba kama muuqan. Xoghayihii ayaa xanaaqay oo ninkii cisbitaalka ka wakiilka ahaa ee meesha noo furay ku amray in uu gogol iyo go'yaal cad cad oo nadiif ah saaro meydka. Shaadhkii uu Aadan Shiine xidhnaa ayaan aad u sii xusuustaa oo ka mid ahaa kuwii uu dharkiisa ugu jeclaa. Waxa markii danbe naloo sheegay in sahan xoog leh ninka waxa dilay loo sameeyay, qoriga lagu toogtayna uu badhku go'naa. Sida aanu markii danbe ogaannay Aadan Shiine xabbaddu waxa ay ka cuskatay qoorta halkaa gadhka hoostiisa, korna waa ay u baxday oo derbigii ka soo hor jeeday dusha saqafka u dhow ayay xabbaduhu ku yaalleen markii aanu subaxnimadii goobtii tagnay. Waxa aad arkaysay in ay halbowle cuskatay. Dhiigga ugu badan ee goobta yaallay waxa ay u muuqatay in uu kii Aadan Shiine ahaa. Siyaad sida aanu wararka ku hellay xabbaddu waxa ay ka cuskatay sarcanta, waxaanay u muuqatay in uu gaadhigii iyo qaadistii danbe ku sii dhiig-baxay. Waxa lagu qaaday baabuur 113 ah oo boolisku lahaa. Naxariistii Janno Ilaahay ha ka waraabiyo."

Alle ha u naxariiste Mujaahid Aadan Sheekh Maxamed Sheekh Cabdi (Aadan Shiine), waxa uu ifka kaga tagay Xaas Busaad Axmed Sheekh Cabdi iyo Shan carruura oo kala ah hal wiil iyo afar hablood.

Dilka loo geystay Mujaahid Aadan Shiine waxa uu naxdin weyn ku noqday Mujaahidiintii SNM, kuwaas oo u arkayay Mujaahidka inuu ahaa tiirarkii ugu waa weynaa ee ay ku taagnayd Jabhaddii SNM, islamarkaana uu ahaa laf-dhabartii SNM oo cadawga ka farxisay, waxaanu ahaa ninkii isku waday ururkii SNM.

Mujaahidiintii SNM dhammaantood Ilaahay ha wada naxariisto. Waxa lagu liibaaney oo la hadhsanayaa guulihii ay u hureen dhiiggoodii qaaliga ahaa. Maalintaa Meey 31dii waxay qiimo weyn ku leedahay SNM iyo Somaliland. Si maalintaa loo sharfo ciidammadii SNM ee ku beegnaa Hargeysa ayaa la odhan jiray Qaybta 31aad. Feysal Cali Sheekh ayaa si kooban uga warramay maalintaasi xusuusaha loo tiriyo, waxaanu yidhi: "31ka Meey ee gudo-galka

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Hargeysa waxa lagu beegay 31kii May 1987kii oo ahayd markii shirqoolka lagu dilay magaalada Jigjiga ee dalka Ethiopia Mujaahid Aadan Sheekh Maxamed Cabdi (Aadan Shiine) oo ka mid ahaa halyeeyadii bud-dhigga u ahaa halgankii hubeysnaa ee dibuxoreynta qaran ee SNM horseedka ka ahayd."

Boobe Yuusuf Ducaale, waxa kale oo aanu ka haynnaa hadalladan xigashada ah oo cajalad maqal ah uu ka qoray oo ah hadallo kooban Aadan Shiine ka jeediyay Shirweynihii 5^aad ee SNM oo 28kii Feeberweri 1987kii ka furmay magaalada Harare e dalka Itoobiya. Aadan Shiine markii uu hadalladan jeedinayay waxa uu ka xanaaqsanaa Mujaahidiin uu doonayay in ay Shirweynaha ka soo qayb-galaan oo aanay suuro-gelin. Aadan Shiine maalinta waxa uu yidhi:

**"Waxa aan soo jeedinayaa in aynaan khaldamin. Waa dagaal waxa aynu ku jirnaa. Iskuma raalli-gelin karno waxa uu dhiig ku daadanayo. Halkan in aynu isku raalli-gelinno uma aynu iman. Qofka wax tilmaamaa haddii uu reer noqonayo xaggee ayaa lagu baxsanayaa. Waxa aanu u doodaynaa kuwii aanu dagaalka gelinnay ee aanu amarka ku haysannay ee nalagu yidhi dagaal geliya ee ku soo baaba'ay ee guryahoodii ku soo baaba'een ee halkaa fadhiya ayaanu leenahay meesha ha ka soo qayb-galaan." Intaa markii uu Aadan Shiine yidhi, ayuu hareeraha eegay si uu tusaalayaal u soo qaato, waxaana intaa hore xigtay: "Xasan Guure mee is-taag…Cabdi Cali Mahdi mee….is-taag…………."**

Qalinkii iyo Tifatirkii:

Fu,aad Sh.Abuubaker
Bahda Mareegta Farshaxan

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

**Raad-raac (Bibliography):**

**-31 May Maalin Kulansatay saddex munaasibadood oo Taariikhi ah.**
**Qoraal: Feysal Cali Sheekh, Jamhuuriya**

**-Wareysi: Mujaahid Rashiid Sheekh Cabdilaahi**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

**-Wareysi: Mujaahid Maxamed Cilmi Galan**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

**-Wareysi: Maxamuud Xujaale**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

**-Wareysi: Agaasimaha Guud ee Wasaarada Warfaafinta**
**Feysal Cali Sheekh**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

**-Wareysi: Mujaahid Cabdiraxmaan Baqdaadi**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

**-Wareysi: Mujaahid Ibraahin Meygaag Samatar**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

**-Wareysi: Aqoonyahan Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

**-Wareysi: Cabdi Yuusf Ducaale (Boobe)**
**-Bahda Mareegta Farshaxan**

-**Mareegaha:**
**Hadhwanaagnews,Gabileynews, Oodweynenews,Farshaxan,Haatuf,Geeska Afrika, RaadTV,Somalilandnews iyo qaar kale**.

Copyright ©2003-2010 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.